# Warbixinta Helitaanka Teknoolojiyadda ee Seattle 2024: Natiijooyinka Muhiimka ah

"Si loo xaqiijiyo ka mid noqoshada, guusha waxbarasho, iyo barwaaqo dhaqaale oo dhammaan dadka degan Seattle ay helaan, waa in aynu sidoo kale ku dadaalnaa sinnaanta dhijitaalka ah ee qof walba." – *Mayor Bruce Harrell*

## Maxaa Daraasaddan Ku Saabsanaa?

Magaalada Seattle waxay dooneysay inay fahamto sida dadka deggan u isticmaalaan tignoolajiyada iyo internetka. Waxay xog-weydiiyeen in ka badan 4,600 qof si ay wax uga ogaadaan:

- Yaa haysta adeegga internetka
- Waa maxay qalabka ay dadku isticmaalaan
- Sida ay dadku ugu kalsoon yihiin uguna fududahay isticmaalka tignoolajiyada
- Waa maxay caqabadaha ka hor istaaga dadka inay internetka galaan

## Yaa haysta helitaanka internetka

- ·98% ee qoysaska Seattle waxay heli karaan internetka guriga (waxaa korodhay 95% sanadkii 2018)
- Hase'ahaatee, qaar ka mid ah dadka deggan waxay la kulmaan caqabado badan si ay internetka u helaan:

- Dadka leh dakhli hoose
- Dadka aan Ingiriisiga ku hadlin sidii luqadooda koowaad
- Dadka leh naafonimo
- Dadka Madow iyo Asalka Ameerikaanka ah
- Dadka waaweyn

# Qiimaha Internetka wuxuu saameeyaa helitaanka iyo isticmaalka



- Inta badan qoysasku waxay ka bixinayaan ugu yaraan $100 bishii si ay u helaan internet
- Qoysaska dakhligoodu hooseeyo waxay ku bixiyaan qiyaastii 5% dakhligooda si ay u helaan internet, halka qoysasku isku-celcelis ahaan ay bixiyaan 2.2%
- Waxaa jira barnaamijyo ka caawin kara qoysaska u qalma inay lacag ku kaydsadaan adeegga internetka, laakiin dad badan ma oga ama ma isticmaalayaan.

# Waa maxay qalabka ay dadku isticmaalaan Seattle



- Ku dhawaad dhammaan qoysaska (95%) waxay haystaan smartphones
- 86% waxay heystaan laabtoobyo
- 67% waxay heystaan taabletis
- Qaar ka mid ah qoysasku waa inay wadaagaan qalabka xubnaha qoyska dhexdiisa, taas oo ka dhigaysa mid adag in shaqo, waxbarasho, ama adeegyo la helo

# Dadku waxay Doonayaan oo u Baahan yihiin Xirfado Dhijitaal ah oo dheeraad ah



- Qiyaastii 60% ee dadka Seattle waxay ku raaxaystaan inay sameeyaan dhammaan hawlaha dhhijitaalka ah ee aasaasiga ah
- Dad badan waxay doonayaan inay wax badan ka bartaan:
    - Ilaalinta macluumaadkooda shaqsiga ah ee internetka
    - Xirfadaha aasaasiga ah ee kumbuyuutarka
    - Isticmaalka barnaamijyada iyo codsiyada
    - Helitaanka shaqooyin internetka ku jira

# Yaa Laga Tagay

**Daraasadda ayaa ogaatay in kooxahaan ay la kulmaan caqabado badan marka ay tignoolajiyada isticmaalayaan:**

- **Dadka waaweyn**
- **Dadka naafada ah**
- **Dadka aan Ingiriisiga ugu hadlin sida afkooda koobaad**
- **Dadka dakhligoodu hooseeyo**
- **Dadka Madow iyo Asalka Ameerikaanka ah**

# Maxay Seattle Ka Qaban Doontaa Arrintaan

**Magaaladu waxay ka shaqeyneysaa in ay:**

1. **U wadaagto natiijooyinkan si ballaaran si ay u helaan taageero dheeraad ah barnaamijyada helitaanka dhijitaalka ah**
2. **Ka caawiso dadka inay wax ka bartaan oo iska diiwaangeliyaan barnaamijyada qiimo dhimis internetka**
3. **Ka caawiso dadka inay helaan qalabka ay u baahan yihiin**
4. **La shaqeyso ururada bulshada si loo bixiyo tababar iyo taageero**
5. **Ka dhigto mid sahlan in dadka ay helaan caawimaad tignoolajiyad**
6. **Dhistoo iskaashi xooggan oo dhexmara qaybaha dadweynaha iyo kooxaha gaarka ah si loo horumariyo helitaanka dhijitaalka ah ee magaalada oo dhan**

# Sababta Ay Tan Muhiim U Tahay



**Haysashada internetka la isku halayn karo iyo aqoonta sida loo isticmaalo tignoolajiyada ayaa u sii kordheysa muhiimadda:**

- **Shaqada**
- **Dugsiyada Waxbarashada**
- **Daryeelka Caafimaadka**
- **Adeegyada Dowliga ah**
- **Isku xirnaanta qoyska iyo bulshada**
- **Helitaanka macluumaad iyo kheyraad**

**Magaaladu waxay rabtaa inay hubiso in qof walba helo qalabka iyo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay uga qaybqaataan dunida sii noqoneysa mid dhijitaal ah. Waa mahadsanyihiin dhammaan xubnaha bulshada ee ka qaybqaatay daraasaddan.**

**Shaqada magaalada ee ku saabsan ka-mid-noqoshada dhijitaalka waxaa lagala socon karaa www.seattle.gov/tech**

Seattle Information Technology